Xeerka Guddiga 4.50.032-P

Cabashooyinka Rasmiga ah ee Dadweynaha

Portland Public Schools waxay u aqoonsan yihiin ardayda, waalidiinta/mas'uuliyiinta, iyo bulshada inteeda kale in ay yihiin shuraako lama huraan u ah hanaanka waxbarashada. Shuraakadan muhiimka ah waa inay helaan fursad ay ku ogeysiiyaan degmada waxyaabaha ay ka welwelsan yihiin. Joogtaynta xiriirada xoogan waxaa kamid ah helitaanka nidaam cadaalad ah, kaas oo cabashooyinka loogu gudbin karo hab waqtigeedii la joogo. Portland Public Schools waxay soo dhaweynaysaa muujinta dareenka taas oo ah fursad barasho, aan ku caddeyno ula jeedkayaga, iyo aan kaga qeybqaadano horumar joogto ah si loogu faa'ideeeyo ardayda oo dhan.

Markii ay suurogasho, tabashooyinka waa in lagu xaliyaa si aan rasmi ahayn iyada oo loo marayo wada xiriir lala yeesho dugsiga ama waaxda si toos ah ugu lug leh arrinta. Haddii qaabkani xallin waayo tabashooyinka, Degmadu waxay bixisaa hanaan cabasho oo rasmi ah. Guddigu wuxuu ku talajiraa in tabashooyinka loo xaliyo sida ugu wanaag badan uguna waafaqsan sharciga gobolka.

Degmadu waxay u adeegtaa jaaliyado kala duwan oo kala ah arday iyo waalidiin/mas'uuliyiin. Xeerka Sinaanta Waxbarshada Jinsiyadaha 2.10.010-P wuxuu bixiyaa: Degmadu waaa inay soo dhaweysaa oo ay awood siisaa ardayda iyo qoysaska, oo ay ku jiraan qoysaska midabka ee aan si buuxda loo mathalin (oo ay ku jiraan kuwa luqadooda koowaad aysan aheyn Ingiriis) inay lamaane lama huraan u yihiin waxbarashadda ardayga, qorsheynta dugsiga iyo go'aan gaarista degmada. Degmadu waa inay abuurtaa jawi soo dhaweyn leh oo ka tarjumaya taageerayana isirka iyo jinsiyadaha kala duwan ee ardayda iyo bulshada.” Nidaamka cabashada waa in lagu hirgaliyaa qaab ay heli karaan, soona dhaweynaya, dhammaan ardayda, waalidiinta / mas'uuliyiinta, iyo xubnaha bulshada. Dhamaan xubnaha hanaanka cabashada waxaa loola dhaqmi doonaa, waxayna ula dhaqmi doonaan kuwa kale si sharaf iyo qadarin leh.

I. Abuurista Ammarada Maamulka iyo dib u eegista; Warbixinta sannadlaha ah; Furfurnaanta iyo helidda

A. Guddiga waxbarashadu wuxuu u xilsaarayaa kormeeraha guud inuu hirgaliyo ammaro maamul oo dejiya hanaanka iyo habka qaaska ah ee loo xalinayo cabashada. Ammarada maamulka iyo wixii isbeddel ah ee ku xiga ee la sameeyo waxaa loo gudbin doonaa Guddiga si dib loogu eego. Guddigu wuxuu sii amrayaa Kormeeraha Guud in uu sameeyo macluumaadka la xiriira hanaanka cabashada xubnaha bulshada dugsiga si qaab la heli karo ah si fududna loo istcimaali karo, waana inuu siiyo tababaro maamulka dhismaha iyo shaqaalaha loo qoondeeyey hirgelinta xeerka iyo ammarada maamulka. . Maaddaama cabashooyinku ay noqon karaan tilmaame muhiim u ah caafimaadka hay'ad, kormeeraha guud wuxuu siinayaa Guddiga ugu yaraan sannadkiiba dukumiinti bixinaya xog ku saabsan isbeddelada iyo arrimaha soo ifbaxay, iyo sidoo kale hab-socodka hanaanka. Sharraxaada buuxda ee nidaamka cabashada, oo ay ku jiraan dhammaan foomamka, waa in laga helaa xafiiska maamulka degmada iyo bogga hore ee barta internetka ee degmada.

1. Noocyada Cabashooyinka

Xeerkani wuxuu bixiyaa habraac loogu xalliyo cabashooyinka sida uu farayo Xeerka Maamulka Oregon ee 581-022-2370, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn cabashooyinka la xiriira:

a) Jaangooyooyin iyo hab-raacyada Waxbarasho
   (1) Manhajka
   (2) Xeeladaha Waxbaridda
   (3) Tijaabada
   (4) La talinta
   (5) Xaddiga fasalka
   (6) Barnaamijyada kale ee waxbarasho
   (7) Agabyada Waxbaridda
   (8) U hogaansanaanta jaangooysyada gobolka
b) Waxbarashada gaarka ah
c) Caafimaadka iyo badbaadada
d) Fursado waxbarasho ee loo siman yahay
e) Badbaadada ciyaaraha
f) Xakameynta iyo/ama go'doominta
g) Takooridda waxbarashada
h) Ka aargudashada ardayga ama waalidka/mas'uulka

II. DHACDO-XILLIYEED

A. Si loo baaro cabashada inta xasuustoodu dhowaan tahay oo marqaatiyada iyo dukumiintiyada ay u badan tahay in la heli karo, cabashada waxaa lagu xareyn karaa waqtiga xadidan ee uu qeexay sharciga gobolka:

1. Laba saNno gudahood kadib markii xadgudubka la sheegay ama dhacdada sharci darrada ah ay dhacday ama dhibanaha soo oggaaday xadgudubka la sheegay ama dhacdada sharci darrada ah. Dhacdooyinka si dabci ahaan u sii jira, waqtiga xaddidan ayaa ka bilaabmaya taariikhda dhacdadii ugu dambaysay; AMA

2. Hal sanno gudahood kadib markuu ardayga dhibaataysan ka qalin-jabiyay, ka guuray, ama haddii kale ka tegay degmada, hadba kan ugu dambeeyay.

B. Waqtiga xaddidan ee lagu gudbiyo cabashada rasmiga ah waxaa laga yaabaa inay degmadu u dheereeyso cabashooyinka waaweyn ee la xiriira arrimaha nabadgelyada ardayda, oo ay ku jiraan kuwa ka yimid anshax xumada shaqaalaha, xadgudubka galmada ama anshaxa, ama eedeymaha kale ee waxyeellada u leh ardayda.

C. Helitaanka cabashada qoraalka ahi waxay bilaabmaysaa 90-ka maalmood ee loo qabtay xalinta cabashooyinka ee hoos imanaya xeerkan.

III. GUDBINTA CABASHADA

A. TALLAABADA 1:

1. Cabashada qoran waa in si warqad, iimeyl, ama foomka cabashada oo qoran ah loogu gudbiyaa isu-duwaha cabashada Degmada. Cabashada qoran waa inay ku jirtaa magaca iyo macluumaadka qofka cabanaya, qeexida cabashada, iyo magaca ardayga, haddii ay suurogal tahay. Way wanaagsanaan lahayd haddii cabashada qoran ay sidoo kale ku jiraan magacyada cid kasta oo kale oo ku lug leh, oo ay ku jiraan markhaatiyaasha, sharraxaad ku saabsan dedaalada xalka loogu doonayay cabashada, iyo soojeedinta sida loo xallin karo. Qofka cabanaya ayaa heli doona aqoonsi qoraal ah oo ku saabsan helitaanka cabashada muddo 5 maalmood gudahood ah kadib marka la soo gudbiyo cabashada qoran.

2. Xaaladaha badankood, Hogaamiyaha degmada ee dugsiga lugta ku leh, ama kormeeraha waaxda ee ku habboon, ayaa mas'uul ka noqon doona baaritaanka iyo ka jawaab celinta cabashada Tallaabada 1. Kormeeraha guud wuxuu u xilsaari karaa go'aan sameeye ka duwan Tallaabada 1 sida ku habboon.

3. Dhamaan cabashooyinka rasmiga ah waxay heli doonaan go'aan qoraal ah oo wax looga qabanayo cabasho kasta oo la soo gudbiyey waxaana la socda sababaha go'aanka Degmadda 30 maalmood gudahood laga soo bilaabo maalinta cabashada la helay, ilaa ay labada dhinac ku heshiiyaan in la kordhiyo waqtiga loo qabtay. Qaraarka waxaa ku jiri doona macluumaad ku saabsan tallaabooyinka xiga ee nidaamka cabashada

IV. GUDBINTA RAFCAANKA

A. TALLAABADA 2: RAFCAAN U QAADASHADA KORMEERAHA GUUD

Haddii arinta aan loo xalinin si uu ku qanacsan yahay qofka cabanaya, wuxuu dalban karaa dib u eegis uu ku sameeyo Kormeeraha Guud. Codsiga dib u eegista waa in lagu soo gudbiyaa qoraal 10 maalmood gudahooda laga soo bilaabo markii cabashadu heshay ogeysiiska qaraarka Tallaabada 1.

1. Kadib dib-u-eegista waxyaalaha horey loo soo gudbiyey ama la soo ururiyey iyo kadib markii la sameeyay dib-u-fiirin dheeri ah, haddii loo arko inay lama huraan tahay, Kormeeraha guud ama qofka loo xilsaaray ayaa soo saari doona go'aan qoraal ah oo ka hadlaya walaac kasta oo la soo gudbiyay iyo sababta go'aanka wuxuuna u gudbinayaa go'aanka qofka cabanaya, iyadoo la raacayo OAR 581-022-2370. Dhammaan cabashooyinka laga codsaday Kormeeraha guud waxay heli doonaan go'aan qoraal ah 30 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta la helo codsiga dib u eegista. Kormeeraha guud ama qofka loo wakiishay ayaa ku dari doona macluumaadka tallaabooyinka rafcaan dheeri ah ee hoos imanaya xeerkan.

2. Markii la helo go'aanka Kormeeraha Guud, haddii qofka cabanaya uu doonayo inuu sii wado rafcaanka, qofka cabanaya wuxuu rafcaan u qaadan karaa Guddiga.

B. TALLAABADA 3: RAFCAAN U QAADASHADA GUDDIGA DUGSIGA PPS

Guddigu waxay u codeyn doonaan nuxurka rafcaanka 30 maalmood gudahood laga soo bilaabo taariikhda codsiga qoraalka ah ee rafcaan ka qaadashada go'aanka kormeeraha guud. Guddigu waxay heli doonaan qoraalka buuxa ee go'aannada Tallaabada 1 iyo Tallaabada 2. Qofka cabanaya wuxuu u soo gudbin karaa macluumaad dheeraad ah oo qoraal ah Guddiga wuxuuna bixin karaa marqaati inta lagu jiro faallada dadweynaha. Guddigu waxay go'aamin doonaan in go'aanka ugu dambeeya ee kormeeraha guud uu yahay:

1. Mid lagu raaco oo aan tallaabo dheeri ah la qaadin; ama

2. Dib loogu noqdo oo waxaa lagu amri karaa Kormeeraha Guud inuu qaado tallaabo kale ama ficil kale. Ilaa xadka uu Guddigu ka beddelayo go'aanka Kormeeraha Guud, guddigu wuxuu soo saari doonaa go'aan kama dambeys ah oo wax ka qabanaya cabasho kasta oo lagu muujiyay cabashada oo ay ku jiraan sababaha go'aanka Degmada.

Haddii qofka cabanaya uusan ku qanacsaneyn go'aanka Guddiga, qofka cabanayaa wuxuu u gudbin karaa rafcaan Waaxda Waxbarashada Oregon (ODE) sida uu dhigayo OAR 581-022-2370 (4) iyo OAR 581-002-0040.

C. Cabashooyinka Qarsoodiga ah

PPS waxay ku aqbashaa cabashooyinka qarsoodiga ah iimeylka anonymouscomplaints@pps.net iyo taleefanka 503-916-3354. Kuwa sida qarsoon u cabanayo waa inay bixiyaan macluumaadka ugu badan ee suurtogalka ah markay sameynayaan cabashada. PPS waxay baari doontaa cabasho kasta, oo ay ku jiraan cabashooyinka qarsoon, sida ugu macquulsan.

D. Adeeeg-bixinta kale

1. Adeegyada tarjumaadda qoraalka iyo hadalka ayaa loo heli karaa dacwoodayaasha.

2. Degmadu waxay siin doontaa ilo loogu talagalay dacwoodayaasha codsada caawimaadda diyaarinta cabasho qoraal ah. CODSO CAAWIMAAD

3. Kormeeraha guud waa inuu ka fogaadaa laba-labeynta, ama muuqaashada laba-labeynta, goorta la magacaabayo wakiilka degmada si loo baaro loogana jawaabo cabashada.

4. Dacwoodayaashu waxay kulan ama dhagaesi kasta u soo wadan karaan qareen ama qof caawiya.

5. Ka aargudashada qofkasta oo soo gudbiya ama ka qeybqaata hanaanka cabashada waa mamnuuc. Aargudashadu waa tallaabo kasta oo caqabad ku noqonaysa ka qeybqaadashada hanaanka ee qof kasta oo macquul ah Qof kasta oo rumeysan inay aargudasho ku dhacday waa inuu si dhakhso leh ugu wargaliyaa Kormeeraha Guud ama Guddiga Agaasimayaasha PPS.

6. Degmadu waxay la wadaagi doontaa dacwoodayaasha macluumaadka ugu badan ee suurogalka ah ee ku saabsan natiijooyinka baaritaanka waxayna kiisaska oo dhan, la wadaagi doonaan natiijada baaritaankeeda cabashooyinka. Hasa ahaatee, PPS badanaa waa laga mamnuucay shaacinta macluumaad gaar ah oo ku saabsan tallaabada anshax marinta ee lagu qaadayo shaqaale ku lug leh cabashada. Guddigu ma dhagaysan doonaan cabashooyinka ka dhanka ah shaqaalaha kalfadhiga u furan dadweynaha haddii shaqaale uu codsado kalfadhi furan mooyee.

7. Haddii degmadu ay ku guul darreysato inay ka soo baxdo xilliga loo dejiyey hanaankan, dacwoodaha wuxuu rafcaan u qaadan karaa Guddiga Dugsiga PPS ama waaxda waxbarashada Oregon. Xilliga la qabtay waxaa lagu kordhin karaa oggolaanshaha labada dhinac ee dacwoodaha iyo Degmada. Tusaale ahaan, tan waa loo baahan karaa haddii ay jiraan markhaatiyaal badan oo la wareysto, marqaatiyaasha muhiimka ah oo fasaxyada ku maqan, fasax caafimaad, iwm, ama haddii kulan gaar ah oo guddiga ah uusan anficin dacwoodaha.

8. Sida loogu adeegsaday xeerkan, “maalmo” waxaa loo aqoonsan doonaa “maalmaha jadwal-sannadeedka.” Waqti kasta oo jawaab bixin oo hoos timaada xeeerkan kuna beeganta dhammaadka isbuuca ama fasaxa sharciga ah waa loo gudbin doonaa maalinta shaqada ee xigta.

9. Degmadu waxaa laga yaaba inay awoodi karin qarsoodiga magacyada dadka gudbiyay cabashooyinka ee hoos yimaada xeerkan.

10. Haddii ay cabashadu sheegayso anshax xumida shaqaalaha ee ka baxsan awoodda xeerkan, isu-duwaha cabashadu wuxuu ku ogeysiin doonaa Kormeeraha guud qoraal ahaan, Degmaduna waxay ku dedaali doontaa inay ka jawaabto wakhti ku habboon cabashada.

11. Shaqaalaha hadda jira iyo kuwii horeba wax cabasho ee ku saabsan shuruudaha, xaaladaha, ama xaalada shaqaaleysiintooda ah kama keeni karaan ayagoo adeegsanayo xeerkan.

E. Cabashooyin ka dhanka ah Kormeeraha guud ama xubnaha Guddiga Waxbarashada

Wixii cabasho ah ee ku saabsan Kormeeraha guud waxaa dib u eegi doona Guddiga Waxbarashada. Xubnaha guddiga ayaa isxilqaan ku shaqeeya kuna shaqeeya awood doorasho waxaana la xisaabtami kara go'aannada ficilladooda iyo xeerkooga muwaadiniinta degmada Portland Public
Schools Cabashooyinka ku saabsan xadgudubyada anshaxeed ama ku xadgudubka sharciga ee ka dhanka ah xubin kamid ah Guddiga waa in loo gudbiyaa guddoomiyaha Guddiga oo arrimahan u gudbin doona hay'adaha dowladeed ee ku habboon ama gacan saddexaad haddii aqlabiyadda Guddiga ay aqbalaan gudbinta. Cabashooyinka la xiriira ku xadgudubka anshaxa ama ku xadgudubka sharciga ee ka dhanka ah Guddoomiyaha Gudiga waa in loo gudbiyaa gudoomiye ku xigeenka guddiga kaasoo u gudbin doona arrimahan hay'adaha dowlada ee ku haboon ama gacan saddexaad haddii aqlabiyada Guddiga ay aqbalaan gudbinta. Haddii gacan saddexaad ay baarto cabasho, kadib marka la helo natiijooyinka baaritaanka, Guddigu waxay go'aan ku gaari doonaan, 30 maalmood gudahood, - si kalfadhi furan ah - ficilka, haddii ay jiraan, la qaadayo.

F. **Cabashooyinka loo gudbiyo xubnaha guddiga dugsiga**

Xubnaha guddiga dugsiga ee cabashooyinka rasmiga ah ka hela xaafadaha ama shaqaaluhu waxay u gudbin doonaan cabashooyinka isu-duwaha cabashada degmada. Xubnaha guddiga waxay u gudbinayaan cabashooyinka aan rasmiga ahayn dugsiga ama waaxda ku habboon si wax looga qabto cabashada.

V. XUQUUQAHA DHEERAADKA AH EE RAFCAAN QAADASHADA

Haddii cabasho uun ay sheegto in lagu xadgudbay Xeerka Maamulka ee Oregon (OAR) Cutubka 581, Qeybta 22 (Jaangooyooyinka), Sharciga Dib-loo-eegay ee Oregon (ORS) 339.285 illaa 339.383 ama OAR 581- 021-0550 illaa 581-021-0570 (Xakameynta iyo Go'doominta), ama ORS 659.852 (Aargudasho), cabashaduna aan lagu xallin nidaamka cabashada, dacwoodaha, oo ah arday, waalid ama mas'uul arday dhigta dugsi ku yaal degmada ama qof degan degmada, ayaa rafcaan uga qaadan kara go'aanka kama dambeysta ah ee ay degmadu u dirtay Ku xigeenka Kormeeraha Guud ee Waxbarista Dadweynaha sida lagu sheegay qaanuunka Maamulka Oregon (OAR) 581- 002-0040.

Haddii cabashadu ay sheeganeyso takoor iyadoo la tixraacayo ORS 659.850 (Takoorka Waxbarashada) dacwoodahu wuxuu rafcaan uga qaadan karaa go'aanka kama dambeysta ah ee Degmadu u gudbiso Waaxda Waxbarashada ee Oregon ama wuxuu si toos ah ugu gudbin karaa cabasho Waaxda Waxbarashada Mareykanka iyada oo aan ku khasbanayn raaacida habraacyada nidaamka degmada sida ku xusan xeerkan.

Ka sokow adeegsiga nidaamka cabashada ee Degmada, cabashooyinka Waxbarashadda Gaarka ah ayaa toos loogu gudbin karaa Waaxda Waxbarashada Oregon. Dacwoodaha waa inuu Degmada u diraa nuqulka cabashada isla marka uu u gudbinayo Waaxda Waxbarashada.

DHAMAADKA XEERKA

Tixraac(a/yada) Sharciga:

ORS 192.610 to 192.690
ORS 332.107
ORS 339.285 to 339.383 ORS 659.852
OAR 581-022-2370